

Cursos de Certificación de Desarrollo Profesional (PDC)

Nooca PDC	Cinwaanka koorsada	Saacadaha credit-ka	Xarumaha Medicare & Adeegyada Medicaid ee Awoodaha Daryeelka Tooska ah
MUHIIMKA AH	Ka dhigida Mid Xirfad leh - KIP Waxaa diiradda la saarayaa doorka shaqaalaha ee dejinta xuduudo xirfadeed, la shaqeynta liiska hawsha, iyo goorta iyo sida wax looga dhigo kuwo qarsoodi ah, iyo talooyinka loogu talagalay haynta diiwaanka.	3.5	Xirfadlenimada iyo Anshaxa Waxqabadka Qofka Ku saleysan Wada xiriirka
	Wada Shaqeynta - WT Wada xiriirka kalsoonida leh iyo farsamooyinka xallinta dhibaataada ee loogu talagalay cidda loo shaqeeyo iyo shaqaalaha; cadeynta waxyaabaha la filaayo; iyo adeegsiga qiyamka iyo luqadda qofka maamulo.	3	Waxqabadka Qofka Ku saleysan Wada xiriirka Xirfadlenimada iyo Anshaxa Awoodsiinta & U doodista
	Caawinta Daryeel Bixiyayaasha ee La dagaalanka Musuqmaasuqa & Xadgudubka - F&A Aqoonsiga iyo soo sheegida ku xadgudubka iyo dacayaada carruurta, dadka waaweyn iyo dadka naafada ah; musuqmaasuqa Medicaid & Medicare; doorka daryeel bixiyaha; xallinta dhibaataada; iyo ilaha degaanka.	3.5	Xirfadlenimada iyo Anshaxa Waxbarashada Tababarka iyo Is-horumarinta qofka
BADBAADADA	Shahaadada Compass - COMP Barnaamijka wuxuu dhiirrigeliyaa ka hortagga dhaawaca iyo ka qayb qaadashada Shaqaalaha Daryeelka Guriga iyo Taageerada Shakhsiyeed ee toddoba (7) kulan, oo mid kasta labba (2) toddobaad u dhexeeyaan.	15	Badbaadada Wada xiriirka Ka hortagga dhibaatooyinka iyo Wax ka qabashada Caafimaadka iyo Fayo-Qabka Waxbarashada, Tababarka iyo Is-horumarinta qofka
	Badbaadada Darawalka - DS Koorsadani waxaa ku jira macluumaad muhiim ah oo darawaliinta cusub iyo kuwa khibrada leh ay tahay in ay ogaadaan si ay ugu sugnaadaan badbaado jidadka, waddooyinka, iyo jidadka waaweyn oo Oregon.	2.5	Badbaadada
	Badbaadada Daawada - MedS Caawinta dadka waaweyn ee maamula daawooda gaarka ah, oo ay ka mid yihiin: noocyada iyo saameynta daawooyinka; ka caawinta dokumentiyada; kaydinta; ogaanshaha/aqoonsiga khataraha iyo astaamaha digniinta; iyo doorka shaqaalaha.	3	Badbaadada Qiimeynta iyo Wax u fiirsashada

Nooca PDC	Cinwaanka koorsada	Saacadaha credit-ka	Xarumaha Medicare & Adeegyada Medicaid ee Awoodaha Daryeelka Tooska ah
BADBAADADA	<p>Gargaarka Degdega ah ee Caafimaadka Dhimirka - (MHFA)</p> <p>Gargaarka Degdega ah ee Caafimaadka Dhimirka waa koorsada tababarka oo xirfadaha ku saleysan taasi oo ka qayb qaatayaasha barta caafimaadka dhimirka iyo arrimaha ku saabsan isticmaalka mukhaadaraadka.</p>	8	Ka hortagga dhibaatooyinka iyo Wax ka qabashada Badbaadada Caafimaadka iyo Fayo-Qabka
	<p>Ka hortaga Gudbinta Cudurka - Sababaha PDT</p> <p>ee cudurrada faafa iyo waddooyinka la iskugu gudbiyo; yareynta khataraha; hababka ugu fiican ee wax loo qabto ee dhanka shaqada guriga iyo daryeel bixinta si looga hortaggo faafida cudurrada.</p>	2	Badbaadada Caafimaadka & Fayo-Qabka
	<p>Iska Ilaalinta Murgacashada & Muruqa jirka gala - PASS</p> <p>Mabaadii'da aasaaska u ah farsamooyinka jirka; isbeddel ku sameynta hawlaha shaqada si loo yareeyo khataraha oo loo ilaaliyo naftaada iyo ta dadka kale; dib u eegida qalabka la adeegsado qaarkood.</p>	3.5	Badbaadada
	<p>Wacyi-gelinta Isticmaalka Mukhaadaraadka - SAA</p> <p>Dib u eeg siyaasadda OHCC ee Goobta Shaqada oo Ka xor Ah Mukhaadaraadka, baro saameynta isticmaalka mukhaadaraadka iyo aalkolada, doorka shaqaalaha, iyo ilo loogu talagalay caawimaada.</p>	3	Badbaadada Qiimeynta & Wax u fiirsashada
	<p>Qaadashada Mas'uuliyadaha Badbaadada Qofka - TRIPS</p> <p>Fikradaha ka hortagga dhaawacyada ka yimaada siibashada iyo kufitaanka guriga dhexdiisa; qiimeynta waxyaabo la xiriira halista; iska caawinta dhanka qorsheynta iyo isku diyaarinta xaaladaha degdega ah; talooyinka gaari wadista ammaanka ah.</p>	3	Badbaadada Ka hortagga dhibaatooyinka iyo Wax ka qabashada
	<p>Qubeyska iyo Nadiifinta - (B&G)</p> <p>Xirfadaha dhanka daryeelka shakhsi ahaaneed ee qubeyska, xiiritaanka, daryeelka maqaarka & nadiifinta iyada oo diiradda la saarayo adeegsiga qiyamka iyo farsamooyinka qofka ku saleysan.</p>	3.5	Waxqabadka Qofka Ku saleysan Caafimaadka & Fayo-Qabka Xirfadaha Nololshada Bulshada iyo Taageerooyinka

Nooca PDC	Cinwaanka koorsada	Saadaha credit-ka	Xarumaha Medicare & Adeegyada Medicaid ee Awoodaha Daryeelka Tooska ah
	<p>Daryeelida Naftaada Adiga oo Daryeelaya Dadka Kale - (C4Y)</p> <p>Aqoon isweydaarsiga isdhexgalka, waxaad baran doontaa sida loo dhiirigeliyo jawiga shaqo oo badbaado iyo caafimaad leh – oo loogu talagalay dadka aad taageerto iyo naftaada.</p>	2.5	Waxbarashada, Tababarka iyo Is-horumarinta qofka Xirfadlenimada & Anshaxa
Koorsooyinka La kala dooranayo	<p>Dementia 101 - (DEM 101)</p> <p>Koorsadani waxay ka hadlaysaa guudmarka aasaasiga ah ee nidaamka dementia iyo noocyada kala duwan; siyaabaha lagu dhiirigeliyo caafimaadka iyo badbaadada; iyo talooyinka dhanka wada xiriirka oo ay ka mid yihiin in la is dejiyo iyo in dhanka wanaagsan wax laga eego.</p>	3	Caafimaadka iyo Fayo-Qabka Badbaadada Awoodsiinta & U doodista
	<p>Sonkorowga iyada oo la eegayo Tirada - (DBN)</p> <p>Fasalkani wuxuu ka hadlayaa aqoonsashada/ogaanshaha maadooyinka carbohydrate-ka; akhriska astaanka warqada ku dhegan iyo maareynta qaybaha cuntada; ka hortagga dhibaatooyinka; baarida sonkorta dhiiga; iyo fahamka tirooyinka iyada oo la bixinayo macluumaadka aasaasiga ee sonkorowga.</p>	3.5	Caafimaadka iyo Fayo-Qabka Badbaadada Awoodsiinta & U doodista
	<p>Wacyi-gelinta Kala duwanaanshaha – Caqabadaha Soo Foodsara Gabdhaha jecel gabdhaha kale ‘Lesbian’, Ragga jecel ragga kale ‘Gay’, Kuwa labbada jinsiba jecel ‘Bisexual’, Dadka waaweyn ee bedeshay jinsiga ‘Transgender’- (LGBT)</p> <p>Baro erey bixinta ‘terminology’ & sharraxaadaha qaarkood, waxaad fahamtaa dadka waaweyn ee ah LGBTQ, oo ogow siyaabaha soo dhawaynta leh oo loo wada dhan yahay.</p>	3	Waxqabadka Qofka Ku saleysan Awoodda Dhaqan ahaaneed Xirfadlenimada iyo Anshaxa
	<p>Qalabka Daawada ee Waara - (DME)</p> <p>Tilmaamo waxtar leh oo ku saabsan badbaado u isticmaalka qalabka dhanka socodka, qalabka qubeyska & musqusha, wiishashka Hoyer, iyo qalabka kale ee caafimaad. Talooyin ku saabsan xulashada ku habboon, iyo adeegsiga qalabka.</p>	4	Badbaadada

Koorsooyinka La kala dooranayo

Nooca PDC	Cinwaanka koorxada	Saacadaha credit-ka	Xarumaha Medicare & Adeegyada Medicaid ee Awoodaha Daryeelka Tooska ah
	Dhammaadka Noloshaha - (EoL) Guudmarka dhammaadka noloshaha, oo ay ku jiraan: habka dhimashada; farqiga u dhexeeya daryeelka daaweynta la adeegsanayo marka loo eego bukaanka hospice; doorka daryeel bixiyaha ee taageerada shakhsi marka la joogo dhamaadka noloshaha.	3	Waxqabadka Qofka Ku saleysan Awoodsiinta & U doodista Qiimeynta & Wax u fiirsashada Awoodda Dhaqan ahaaneed Caafimaadka & Fayo-Qabka Waxbarashada, Tababarka iyo Is-horumarinta qofka
	Qof walbaa Xiriir Ayuu Sameeyaa - (EC) Baro istiraatiijiyadaha wada xiriirka waxtarka leh ee saameynta wanaagsan u leh dadka aad ka taageerto caqabadaha dhanka wada xiriirka iyo/ama qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka kuwaasi oo la kulma caqabadaha dhanka wada xiriirka.	4	Waxqabadka Qofka Ku saleysan Wada xiriirka Awoodsiinta & U doodista Xirfadlenimada & Anshaxa
	Murugada & Qof dhintay - (G&L) Fahamka habka murugada, khuraafaadka iyo xaqiiqooyinka murugada iyo qof dhintay, siyaabo lagu caawiyo dadka kale, daalka badan iyo daryeelka naftaada.	3.5	Xirfadlenimada iyo Anshaxa Wada xiriirka Waxbarashada, Tababarka iyo Is-horumarinta qofka
	Wadnaha Caafimaadka qaba - (HH) Sida wadnuhu u shaqeeyo, fahamka dhibaatooyinka wadnaha ee badanaa dhaca, la socodka cadaadiska dhiigga, aqoonsiga xaaladaha wadnaha ee degdega ah, iyo abuurista hab-nololeed dhanka wadnaha ah oo caafimaad leh.	3	Caafimaadka iyo Fayo-Qabka Badbaadada Awoodsiinta & U doodista
	Hordhaca Awoodda Dhaqan ahaaneed - (ICC) Koorxadani isdhexgalka iyo soo jiidashada leh waxay bixisaa hordhaca dhaqanka, awoodda dhaqan ahaaneed, iyo doorkooda ku aadan bixinta taageerooyinka qofka ku saleysan.	2.5	Awoodda Dhaqan ahaaneed Waxqabadka Qofka Ku saleysan Awoodsiinta iyo U doodista
	Xaqiiqooyinka Nafaqada - (NB) Nafaqada aasaasiga ah, qaybaha nafaqada, wakhtiga cuntada, isku dheelitirka cuntada oo la adeegsanayo istiraatiijiyado iyo waxyaabo qofka muhiimada la siinayo si loo dhiirgeliyo kala doorashooyin laga warqabo iyo sidoo kale walwalka inta badan la xiriira nafaqada.	4	Caafimaadka iyo Fayo-Qabka Awoodsiinta & U doodista Xirfadaha Noloshaha Bulshada iyo Taageerooyinka

Koorsooyinka La kala dooranayo

Nooca PDC	Cinwaanka koorlada	Saacadaha credit-ka	Xarumaha Medicare & Adeegyada Medicaid ee Awoodaha Daryeelka Tooska ah
	<p>Adeegyada La siinayo Qof Aragga Lumiyay - (LV1)</p> <p>Koorladani waxaa dhiga Guddiga oo loogu talagalay Qof aan indho qabin. Wax ka ogow la shaqeynta qof qaba naafanimada aragga. Tani waa ka mid ah dhaqanka wanaagsan, talooyin, iyo sida loo taageero madax bannaanidooda.</p>	2	Qofka Ku saleysan Badbaadada Caafimaadka iyo Fayo-Qabka
	<p>Daryeelka Neefsashada: Oksijiinta ilaa Daryeelka Neefsashada - (RC)</p> <p>Heerka u dambeeya ee xanuunka neefsashada, aasaaska oksijiinta, daawooyinka neefshada 'nebulizers', iyo daryeelka neefsashada.</p>	3.5	Caafimaadka iyo Fayo-Qabka Badbaadada Awoodsiinta & U doodista
	<p>Xanuunka Farsameynta Dareenka – Dadka waaweyn - (SPD-A)</p> <p>Waxay ka hadlaysaa waxyaabaha soo socda: waxa uu yahay Xanuunka Farsameynta Dareenku; guudmarka dareennada; ASD iyo ADHD; fahamka sida uu qofka weyn oo leh SPD u arko macluumaad; taageerada loogu talagalay socodka bulshada.</p>	3	Waxqabadka Qofka Ku saleysan Wada xiriirka
	<p>Xanuunka Farsameynta Dareenka - Carruurta - (SPD-C)</p> <p>Waxay ka hadlaysaa Xanuunka Farsameynta Dareenka; guudmarka dareennada; ASD iyo ADHD; saameynta ay ku leedahay maalinta ilmaha; fahamka sida uu ilmaha leh SPD u arko macluumaad; iyo cuntooyinka dareenka.</p>	3	Waxqabadka Qofka Ku saleysan Wada xiriirka
	<p>Maareynta Walwalka iyo Farsamooyinka Nasashada -(SMART)</p> <p>Fahamka walwalka iyo saameyntiisa; ogaanshaha waxyaabaha kiciya; madadaalada iyo farsamooyinka wax ku oolka ah ee loogu talagalay wax ka qabashada walwalka.</p>	3	Waxbarashada, Tababarka iyo Is-horumarinta qofka Xirfadlenimada iyo Anshaxa
	<p>La shaqeynta Dabeecadaha Adag - (CB)</p> <p>Macluumaadka wax ku oolka ah oo ku saabsan la shaqeynta dadka waayeelka ah iyo dadka waaweyn ee qaba naafanimada dhanka jirka ee la xiriira noocyada iyo waxyaabaha sababa dabeecadaha adag; xallinta dhibaataada; iyo fikradaha wada xiriirka.</p>	3	Waxqabadka Qofka Ku saleysan Wada xiriirka Badbaadada Xirfadlenimada iyo Anshaxa

Nooca PDC	Cinwaanka koorsada	Saacadaha credit-ka	Xarumaha Medicare & Adeegyada Medicaid ee Awoodaha Daryeelka Tooska ah
Aan ahayn - PDC	<p>Diyaar garow, Is habee, Shaqee - (RSW)</p> <p>Abuurista habka suuqgeynta xirfadeed ee la xiriira shaqo helista; sida loo isticmaalo Diiwaanka; iyo waxa ay tahay in aad sameyso ka hor inta aadan bilaabin shaqo.</p>	4	Waxbarashada, Tababarka iyo Is-horumarinta qofka